NEWBORN SCREENING **ONTARIO**
DÉPISTAGE NÉONATAL **ONTARIO**

# BAARITAANKA ILMAHA-HADDA-DHASHAY IYO ILMAHAAGA:

Biloow caafimaad leh ayaa keena nolol ka caafimaad badan

## HORE U HELIDDA CUDURKA WAXAY KEENTAA HORE U DAAWEYN

Waalid cusub ama ilmo-sugaya ahaan, ilmahaaga caafimaadkiisa muhiim buu kuu yahay. Inkastoo caruurta-yaryar badankood aay u muuqdaan kuwa caafimaad qaba markeey dhashaan, waxaa dhici karta in aay halis ugu jiraan dhibaatooyin caafimaad oo khatar ah haddii aay leeyihiin cudur aan hore loo helin loona daaweyn. Si aad uga caawiso ilmahaaga in uu sida ugu fiican nolosha ku bilaabo, ilmahaaga-hadda-dhashay – iyo ilmo walbo oo ku dhashay Ontario – waxaa loo bandhigi doonaa in laga baaro cuduro khatar oo aan badneyn. Cuduradan koox ahaan waxay saameeyaan qiyaastii 225 ka mid ah in ku dhow 143,000 ee ilmaha ku dhasha Ontario. Hadafka baaritaanka waa in hore loo helo – si daaweynta hore loogu bilaabi karo taasoo caafimaad qab ka wanaagsan lagu gaari karo.

Baaritaanka ilmaha-hadda-dhashay khasab ma aha. Waxaa loo tixgeliyaa in uu yahay xanaanada caadiga ah ee ilmo walbo waano talo aad u fiican. Waxaad xaq u leedahay in aad uogolaato iyo in aad u diido ilmahaaga dhashay baaritaanka. Go'aankan waxaad kala hadli kartaa dhaqtarkaaga, umulisadaada ama daryeel caafimaad bixiye kale. Baaritaanka ilmaha-hadda-dhashay waa sida kaliya ee hore loogu ogaado cuduradan si looga hortago dhibaatooyin caafimaad oo khatar ah, muddo dheerna ah.

### Baaritaan yar, oo keenaya faa'iidooyin waaweyn

Si aad u sameyso baaritaan wax-lagu-kala-saarayo, waxaa ilmahaaga laga qaadayaa dhiig yar. Caadi ahaan waxaa laga qaadaa ilmahaaga inta u dhaxeysa 24-48 saac dhalashada ka dib iyadoo laga mudayo qoobka oo dhiigana kaar warqad gaar ah la saarayo. Waa in lagu siiyaa warqad macluumaad ah oo dusha ku leh lambar soo xigasho ah. Lambarkan waxaa loo isticmaali karaa in lagu xiro dhiiga laga qaaday ilmahaaga. Dhiigan la qaaday waxaa ka dib loo diraa Baaritaanka Ilmaha-hadda-dhashay Ontario(NSO) halkaasoo looga baaro cuduro dhif ah ama aan badneyn:

- Cudurada dheefshiidka
- Cudurada Qanjirada-hoormoonada
- Cudurka Sickle Cell (SCD)
- Cystic Fibrosis (CF)
- Severe Combined Immune Deficiency (SCID)

Baaritaanka ilmaha-hadda-dhashay sidoo kale waxaa ku jira Cudurka Wadnaha ee Khatarta ah ee Lagu-dhasho (CCHD). Baaritaan deg-deg ah oo aan xanuun lahayn oo la yiraahdo cabiraadda-oksijiinta ee garaaca-wadnaha (pulse oximetry) ayaa cabira heerka oksijiinta ee dhiiga ilmaha-yar. Natiijooyinka isla markiiba waa la heli karaa.

Ontario

**SOMALI** - NEWBORN SCREENING AND YOUR BABY: A healthy start leads to a healthier life - Catalogue No. 026913 ISBN 978-1-4868-3050-3 April 2019 © Queen's Printer for Ontario

NSO, iyadoo la shaqeyneysa Barnaamijka Maqalka Caruurta-yaryar Ontario, waxay bixisaa baaritaan loogu talogalay khatarada la xiriirta luminta maqalka iyadoo isticmaaleysa dhiiga laga qaado baaritaanka ilmaha-hadda-dhashay. Baaritaankan dheeraadka ah waxaa lagu sameeyaa ogolaashaha waalid ama weliga ee laga qaaday markii la sameynayey baaritaanka maqalka.

Liiska cudurada oo buuxa waxaa laga heli karaa website-ka NSO: www.newbornscreening.on.ca

## Natiijooyinka baaritaanka: khatar sare iyo khatar hoose

Natiijooyinka baaritaanka waxay muujinayaan in ilmahaaga uu cudurka ugu jiro khatar sareysa ama khatar hooseysa, laakiin ma aha baaritaano haa ama maya ah (sidoo kale waxaa loo yaqaanaa baaritaano "wax-kala-saarid"). Haddii ilmahaaga uu lahaado calaamado cudur, dhaqtarka ilmahaaga waa in uu sameeyaa baaritaano wax-kala-saaraya. Fadlan maskaxda ku haay in baaritaanada ilmaha-dhashay aan laga baarin dhibaatooyinka cudurada khatarta ah oo dhan.

**Natiijo taban ee baaritaan** macnaheedu waa fursadda uu ilmahaaga ku lahaado mid ka mid ah cuduradan aad beey u yar tahay loomana baahna baaritaan dabogal ah. In ka badan boqolkiiba 99 caruurta la baaro waxay lahaan doonaan natiijo taban.

**Natiijo togan ee baaritaan** macnaheedu waa ilmahaaga wuxuu leeyahay fursad sareeysa oo ah in uu lahaado mid ka mid ah cuduradan wuxuuna u baahan yahay baaritaan dheeraad ah. Lagama maarmaan ma aha in ilmahaaga uu leeyahay cudur. Kiiskan, dhaqtarada Baaritaanka Ilmaha-hadda-dhashay Ontario (NSO) ayaa u diri doona ilmahaaga dhaqtar takhasus leh oo baaritaan dabagal ah sameeya. Waxaa kula soo xiriiri doona daryeel caafimaad bixiyahaaga (HCP) ama dhaqtar takhasus leh haddii baaritaanka ilmahaaga uu leeyahay natiijyo togan. Haddii HCP-ga ilmahaaga uu wax ka qabo natiijada baaritaanka Cudurka Wadnaha ee Khatarta ee Lagu-dhasho (CCHD), iyagaa waqtiga baaritaanka kuu qabanqaabin doona baaritaano dheeraad ah.

**Waxaa dhici karta in lagu weydiisto in aad soo celiso ilmahaaga si looga qaado baaritaan ku-celis ah.** Tan waxay dhici doontaa haddii:

- Haddii dhiiga ugu horeeya ilmahaaga laga qaaday isagoon dhalaneyn/gaarin 24 saac
- Dhiig aan ku filneyn haddii laga qaaday
- Dhiiga qaadistiisa ayaa ahayd mid tayo xun

Cisbitaalkaaga ama umulisadaada ayaa kula soo xiriiri doonta haddii loo baahnaado dhiig qaadis in lagu celiyo. Waa muhiim in sida ugu dhaqsiyaha badan loogu celiyo dhiig qaadis si ilmahaaga uu u helo faa'iidada baaridda ilmaha-hadda-dhashay. Baahida ku celinta dhiig qaadista macnaheedu ma aha in ilmahaaga aay wax ka qaldan yihiin.

Caruurta qaar baa u baahan in lagu celiyo baaritaankooda CCHD sababtoo wuxuu ahaa mid aan dhameystirneyn. Haddii baaritaanka CCHD ee ilmahaaga uu ahaa mid aan dhameystirneyn, wixii ku saabsan talaabooyinka ku xiga ee la qaadi doono waxaa kula soo xiriiri doona HCP-gaaga ama cisbitaalka sameeyey baaritaanka.

Natiijooyinka waxaa loogu diri doonaa cisbitaalka ama HCP-ga sameeyey baaritaanka, boosto ama elektaroonik ahaan iyadoo la marayo Habka Macluumaadka Sheybaarada Ontario (OLIS). HCP-ga ilmahaaga-yar ayeey dhici kartaa in uu OLIS ka helo natiijooyinka. NSO si toos ah natiijooyinka uma siiso waalidiinta/weliyada.

## Baaritaanada cuduradan ma lagu heli karaa waxyaabo kale?

Mararka qaarkood baaritaanada waxay muujin doonaan in ilmo uu leeyahay cuduro aan ahayn kuwa la bartilmaameedsaday. Haddii wax sidan oo kale ah la helo, qof takhasus leh ayaa kaala hadli doona. Baaritaanada cudurada qaarkood waxaa dhici karta in lagu ogaado in ilmahaaga uu yahay side (sidoo kale loo yaqaan astaan-hiddo). Caruurta ah sidayaal waa caafimaad qabaan umana baahna wax daaweyn ah. Natiijooyinka sidaha codsi baa lagu heli karaa. Xogta ku saabsan sida loo helo natiijada sidaha ilmahaaga waxay ku taal website-ka NSO – ama, weydii daryeel caafimaad bixiyaha ilmahaaga.

## Difaacidda ilmahaaga xogtiisa-gaarka ah iyo qarsoodinimada

Baaritaanka Ilmaha-hadda-dhashay Ontario (NSO) waxaa ka go'an in aay u keydiyaan dhiiga laga qaaday ilmahaaga-yar iyo macluumaadkiisa si amaan ah oo qarsoodi ah, iyadoo la raacayo sharciga sida loo ururinayo iyo sida loo isticmaalayo. Waxaa loo isticmaali karaa bixinta daryeel caafimaad, hubinta tayada, iyo cilmi-baaris. Macluumaadka caafimaadka shaqsiga ah (PHI) waxaa wadaaga daryeel caafimaad bixiyayaasha ku howlan baaritaanada ilmaha-hadda-dhashay iyo wax-kala-saaridda si loo hubiyo in ilmaha uu u helo daryeelka iyo dabogalka loo baahan yahay. PHI sidoo kale waxaa lala wadaagaa Habka Sheybaarada Ontario (OLIS). Haddii aadan dooneyn macluumaadka in la wadaago, fadlan hubi in aad u sheegto sidaad jeclaan lahayd daryeel caafimaad bixiyahaaga iyo/ama la xiriir NSO.

Baaritaanada markeey dhamaadaan ka dib, dhiiga laga qaaday ilmahaaga waxaa lagu keydinayaa meel sugan qeyb ka mid ah diiwaanka caafimaad ee ilmahaaga ahaan. Waxaa la keydinayaa 19 sanno ka dibna waa la baabi'nayaa. Dhiiga la qaaday waxaa loo keydiyaa si loogu isticmaalo hubinta tayada baaritaanada ilmaha-hadda-dhashay. Tan waxaa ka faa'iidi kara ilmahaaga iyo dhamaan caruurta Ontario. Waxaa kaloo suurogal ah baaritaanada in loo isticmaalo qeyb ka mid ah Baaritaanada Maqalka La-balaariyey wadashaqeynta aay la leeyihiin Barnaamijka Maqalka Caruurta-yar-yar Ontario. Tan waxaa lagu sameyn karaa in ogolaansho adiga lagaa helo oo kaliya. Dhiiga laga qaaday ilmahaaga dhaqtarka ilmahaaga ayaa u baahnaan kara mustaqbalka si uu baaritaano dheeraad ah ugu sameeyo. Keydinta dhiiga laga qaaday macnaheedu waxay tahay in la heli karo, haddii loo baahdo. Isticmaalidda kale ee suurogalka ah ee dhiiga la keydiyey waxaa ku jira baaritaanada aay sameeyaan sheybaarada kale markaad ka codsato, sameynta baaritaanada NSO ee cusub ama kuwa la hagaajiyey, isticmaalidda marka la bixiyo warqad maxkamadeed ama amar maxkamadeed, iyo cilmi baaris aay ansixiyeen guddoonka anshaxa. Guud ahaan, warka ku xiri kara ilmahaaga dhiiga baaritaanka loo qaaday waxaa lala wadaagi karaa oo kaliya cidda aad qoraal ahaan ugu ogolaato in lala wadaago ama haddii sharciga u baahdo.

Haddii aad jeclaan lahayd in ilmahaaga dhiiga laga qaado aan la keydin, waxaad weydiin kartaa NSO in aay baabi'so dhiiga ama aay adiga ku siiyaan. Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriir NSO.

## Wixii war dheeraad ah

Haddii aad leedahay wax su'aal ah oo ku saabsan baaritaanka ilmaha-hadda-dhashay Ontario, fadlan la hadal cidda ah bixiyaha daryeelka caafimaadka ama si toos ah ula xiriir *Baaritaanka Ilmaha-hadda-dhashay Ontario.*

**Website**
www.newbornscreening.on.ca

**Taleefan**
Bilaash Ku-wac: 1-877-NBS-8330
(1-877-627-8330)
8:00 SUBAXNIMO – 16:00 GALABNIMO

**Email**
NSO@cheo.on.ca

**Boosto**
Newborn Screening Ontario
Children's Hospital of Eastern Ontario
415 Smyth Road
Ottawa, Ontario K1H 8M8

**YouTube**
Youtube.com/user/NBSOntario

**Twitter**
@NBS_Ontario